



**Iftin** Foundation



# **Sahanka**

*Qalinjebiyeyaasha  
Jaamacadaha  
Dalka ee Sanadka  
2017*

*Iftin Foundation*  
*Maka Almukarama Rd.*  
*Tel: +252 613 060905*  
*Email: [info@iftinfoundation.org](mailto:info@iftinfoundation.org)*  
*Website: [www.iftinfoundation.org](http://www.iftinfoundation.org)*

April 2018  
Mogadishu - Somalia

© Iftin Foundation

## **1. HORDHAC**

Ku soo dhowow tirakoobka qalinjebiyayaashii Jaamacadaha Soomaaliya ee sanadkii la soo dhaafay (2017). Daraasaddan oo ah tii labaad ee nooceda ah oo ay sameeyso Iftin Foundation ayaa looga gol leeyahay sidii loo ogaan lahaa tirada ardayda ka soo baxaya Jaamacadaha dalka ee ku soo biiraya suuqa shaqada, waxa ay soo barten iyo goobaha ay ku nool yihiin, si xogtaas loo barbardhigi karo fursadaha shaqo ee dalka ka jira. Waxay xogtani sahleysaa in la ogaan karo sida ay isugu dhigmaan fursadaha shaqo ee jira iyo tirada ardayda soo qalinjebisay ee shaqodoonka ah.

Daraasaddan oo socotay bilihii ugu dambeeyay ee sanadkii tagay ee 2017, ayaa waxaa inoo suurtagashay inaan gaarno tirada ugu badan oo ay suurtagalka ahayd in la gaaro ee Jaamacadaha laga qalinjebiyay. waxaa xogta laga soo ururiyay illaa 36 Jaamacadood oo ku kala yaala magaalooyinka Muqdisho, Gaalkacyo, Baydhabo, Beledwyne, Jowhar, Marko, Dhuusamareeb, Boosaaso, Garowe, Qardho, Ceerigaabo, Galdogob, Buuhoodle iyo Kismaayo, tirada ardayda ee ka soo qalinjebisayna waxay gaarayaan 11,263 arday.

Maadaama ay Jaamacadaha badankood afka Ingiriiska u adeegsadaan magacbixinta kulliyadaha, waxaan inta badan adeegsaneynaa af Ingiriis.

## **2. DHINACYADA LAGU EEGAY SAHANKAN**

Si loo helo xog dhammeystiran waxaa sahankan lagu eegay kulliyadaha ay ka baxeen ardeyda, lab iyo dheddig, Jaamacadaha ay ka baxeen, iyo deegaannada ay wax ku barten. Sahankan ayaa loogu talagalay inuu sawir guud ka bixiyo nooca ardeyda noo soo qalinjebisay.

### **2.1 Kulliyadaha iyo Ardeyda ka soo baxday**

Waxaan sahan ku sameynay kulliyad kasta ardeyda ka soo qalinjebisay, waxaana kulliyadaha isugu ururinay hadba sida ay isku leeyihiin, inkastoo Jaamacadihii aan daraasadda ku sameynay ay wax yar ku kala duwanaayeen magacbixinta kulliyadaha qaarkood. Si loo fahmo waxaan xusi doonnaa kulliyadaha la mideeyay, si xogtu u urursanaato.

Xogtu waxay muujineysaa in saddexda kulliyadood ee ay ka soo baxeen ardeyda ugu badan ay kala yihiin:-

1. Maamulka Hawlaha (Business Administration) sida Accounting, Human Resources, Banking & Finance) oo tirada ka soo baxday ay gaareyso 1,732 qof oo wadarta guud ka ah 15.38%;
2. Kalkaaliyennimo iyo Umulisonnimo (Nursing & Midwifery) oo ay ka soo baxeen 1,503 qof oo wadarta guud ka ah 13.34%, iyo
3. Maamulka Guud (Public Administration) oo ay ka soo baxeen 1,316 qof oo wadarta guud ka ah 11.68%.

Halka saddexda kulliyadood ee ay ka soo baxeen ardeyda ugu yar ay kala ahaayeen:-


1. Tirakoobka iyo Qorsheynta (Statistics & Planning) oo ay ka soo qalinjebiyeen 11 arday keliya oo wadarta guud ka ah 0.10%.
2. Culuunta Siyaasadda (Political Science) oo ay ka soo qalinjebiyeen 18 arday oo wadarta guud ka ah 0.16%; iyo
3. Saxaafadda (Journalism) oo ay ka soo baxeen 33 qof oo wadarta guud ka ah 0.29%.

### Waa kan liiska oo dhammeystiran

No.	Kulliyadda	Tirada Ardayda	%
1	Business Administration (Accounting, HR, Banking & Finance)	1,732	15.38%
2	Nursing & Midwifery	1,503	13.34%
3	Public Administration	1,316	11.68%
4	Computer Science/IT& BIT	1,231	10.93%
5	Public Health	1,227	10.89%
6	Medicine & Surgery	695	6.17%
7	Economics	566	5.03%
8	Sharia/Law	435	3.86%
9	Laboratory	430	3.82%
10	Development & International Studies	388	3.44%

11	Islamic Studies (Kitab & Sunnah, Hadith, Fiqhi)	299	2.65%
12	Education	289	2.57%
13	Agriculture	277	2.46%
14	Engineering (Civil, Electrical, Mechanical & Telecom)	245	2.18%
15	Veterinary	124	1.10%
16	Nutrition	108	0.96%
17	Pharmacology	98	0.87%
18	Social Science	84	0.75%
19	Clinical Medicine	43	0.38%
20	Arts (Languages)	42	0.37%
21	Criminology	35	0.31%
22	Maritime & Marine	34	0.30%
23	Journalism	33	0.29%
24	Political Science	18	0.16%
25	Statistics & Planning	11	0.10%
<b>Total</b>		<b>11,263</b>	<b>100.00%</b>

F.G. Waxaa kulliyadaha loo kala sare mariyay sida ay u kala arday badan yihiin.



## 2.2 Tirada Wiilasha iyo Gabdhaha

Sahanka waxaa sidoo kale lagu eegay tirada guud ee gabdhaha iyo wiilasha ee Jaamacadaha ka baxay iyo sida ay ugu kala qeybsan yihiin kulliyad walba. Guud ahaan tirada gabdhaha ka qalinjebiyay Jaamacadaha dalka 2017 waa 3,803 oo wadarta guud ka ah 34%. Halka tirada guud ee wiilashana ay tahay 7,460 oo wadarta guud ka ah 66%.

Gabdhaha ugu badan waxay ka soo qalinjebiyeen saddexda kulliyadood ee kala ah:-

- 1) Nursing & Midwifery (1125 gabdhood);
- 2) Public Health (655 gabdhood) iyo
- 3) Business Administration (370 gabdhood).

Dhanka kale tirada gabdhaha ugu yar ayaa ka soo qalinjebiyay saddexdaan kulliyadood:-

- 1) Criminology & Statistics & Planning (Min 1 gabar)
- 2) Political Science (2 gabdhood) iyo
- 3) Maritime & Marine (5 gabdhood).

Sidoo kale wiilasha ugu badan ayaa ka soo qalinjebiyay saddexda kulliyadood ee kala ah:-

- 1) Business Administration (1,362 wiil)
- 2) Computer Science & IT (1,118 wiil) iyo
- 3) Public Administration (1,048 wiil)

Halka tirada wiilasha ugu yar iyaguna ay ka qalinjebiyeen saddexdaan kulliyadood:-

- 1) Statistics & Planning (10 wiil)
- 2) Clinical Medicine (14 wiil) iyo
- 3) Political Science (16 wiil)


### Waa kan liiska oo dhammeystiran

No.	Kulliyadda	Tirada Ardayda	Wiilal	%	Gabdho	%
1	Business Administration (Accounting, HR, Banking & Finance)	1,732	1362	79%	370	21%
2	Nursing & Midwifery	1,503	378	25%	1125	75%
3	Public Administration	1,316	1048	80%	268	20%
4	Computer Science/IT& BIT	1,231	1118	91%	113	9%
5	Public Health	1,227	572	47%	655	53%
6	Medicine & Surgery	695	363	52%	332	48%
7	Economics	566	418	74%	148	26%

8	Sharia/Law	435	360	83%	75	17%
9	Laboratory	430	230	53%	200	47%
10	Development & International Studies	388	259	67%	129	33%
11	Islamic Studies (Kitab & Sunnah, Hadith, Fiqhi)	299	167	56%	132	44%
12	Education	289	233	81%	56	19%
13	Agriculture	277	250	90%	27	10%
14	Engineering (Civil, Electrical, Mechanical & Telecom)	245	234	96%	11	4%
15	Veterinary	124	100	81%	24	19%
16	Nutrition	108	60	56%	48	44%
17	Pharmacology	98	80	82%	18	18%
18	Social Science	84	69	82%	15	18%
19	Clinical Medicine	43	14	33%	29	67%
20	Arts (Languages)	42	32	76%	10	24%
21	Criminology	35	34	97%	1	3%
22	Maritime & Marine	34	29	85%	5	15%
23	Journalism	33	24	73%	9	27%
24	Political Science	18	16	89%	2	11%
25	Statistics & Planning	11	10	91%	1	9%
<b>Total</b>		<b>11,263</b>	<b>7,460</b>	<b>66%</b>	<b>3,803</b>	<b>34%</b>

E.G. Waxaa kulliyadaha loo kala sare mariyay sida ay u kala arday badan yihiin.

Tirakoobka  
Wiilasha iyo  
Gabdhaha



## 2.3 Deegaannada Jaamacadaha

Waxaa sidoo kale tirakoob ku sameynay deegaannada ay ku yaallaan Jaamacadaha si loo eego sida ay qalinjebiyeyaashu ugu kala badan yihiin gobollada dalka.

Xogtan waxay muujineysaa in afar meelood saddex meel ardeyda qalinjebisay oo u dhiganta (75.30%) ay ka baxeen jaamacado ku yaalla magaallada Muqdisho.

Sida ay muujinayso shaxdan hoose:


No	Deegaanka	Tirada Ardayda	Boqollay ahaan
1	Muqdisho	8481	75.30%
2	Boosaso	882	7.83%
3	Gaalkacyo	677	6.01%
4	Garowe	457	4.06%
5	Baladwayn	259	2.30%
6	Jowhar	129	1.15%
7	Baydhabo	109	0.97%
8	Kismaayo	91	0.81%
9	Marko	52	0.46%
10	Qardho	45	0.40%
11	Buuhoodle	36	0.32%
12	Galdogob	17	0.15%
13	Ceerigaabo	15	0.13%
14	Dhuusamareeb	13	0.12%
Total		11,263	100.00%



**11,263 Arday**  
Tirada Guud ee  
Ardayda ka  
qalinjebisay sanadkii  
2017kii

**36 Jaamacdood**  
oo ku kala yaala  
Puntland, Galmudug,  
Hirshabeelle,  
K/Galbeed, Jubalan  
iyo G/Benaadir





## 2.4 Jaamacadaha ay ka baxeen

Waxaa sidoo kale tirakoob lagu sameeyay sida ay Jaamacaduhu u soo kala saareen ardeyda. Sharxdan hoosana waxay tilmaamaysaa sida Jaamacaduhu ugu kala badnaayeen ardayda ka soo qalinjebisay sanadkii 2017kii.

No	Jaamacadda	Tirada Guud	Boqollay ahaan
1	University of Somalia (UNISO)	1503	13.34%
2	Jobkey University	999	8.87%
3	East Africa University	855	7.59%
4	Horseed International University	804	7.14%
5	Plasma University	765	6.79%
6	Mogadishu University	743	6.60%
7	Salaam University	584	5.19%
8	Simad University	570	5.06%
9	Somali International University (SIU)	521	4.63%
10	Benadir University	442	3.92%
11	Galkacyo University	345	3.06%

12	University of Bosaso	330	2.93%
13	Hope University	316	2.81%
14	Sabo University	244	2.17%
15	Puntland State University (PSU)	207	1.84%
16	Modern University	206	1.83%
17	Jazeera University	199	1.77%
18	Jamhuriya University	189	1.68%
19	Horn of Africa University	149	1.32%
20	Galkacyo International University	137	1.22%
21	Hormuud University	134	1.19%
22	Islamic University	133	1.18%
23	Darul-Hikma University	115	1.02%
24	Beledwein University	104	0.92%
25	Green Hope University	85	0.75%
26	Hiran University	84	0.75%
27	Imam University	79	0.70%
28	Pan African International University	74	0.66%
29	University of Sothern Somalia	66	0.59%
30	Lower Jubba University	60	0.53%
31	Kownayn University	46	0.41%
32	Bay University	43	0.38%
33	Addoun University	42	0.37%
34	Jubba University	36	0.32%
35	Kismayo University	31	0.28%
36	Global Science University	23	0.20%
Total		11,263	100.00%



Tirada Wiilasha

7,460

66%


Tirada Gabdhaha

3,803

34%



## Jaamacadaha iyo sida ay u soo kala saareen Ardayda




### 3. GUNAANAD

Xogtan ay soo ururisay Hay'adda Iftin waxaa looga gol lahaa in lagu iftiimiyo nooca aqoonyahannada dalkan u soo baxaya iyo xirfadaha ay soo barten, taas oo sawir guud siin karta cid kasta oo ku hawlan horumarka dalka, waayo horumar kasta oo la sameeya waxaa aasaas u ah bani'aadamka.

Daraasaddan oo noqon doonta mid joogta ah sanad kasta, waxaan sanadaha soo socda sii faahfaahin doonnaa xogahan, inagoo ka eegeyna dhinacyo ka badan intii aan qiimeynta ku sameynay oo ay ka mid tahay in isbarbardhig lagu sameeyo kororka iyo hoos-u-dhaca ku yimaada tirooyinka, iyo qaybo kale.

Ugu dambeyntii, waxaan u mahadcelineynaa dhammaan Jaamacadihii noo soo gudbiyay xogtooda, sidoo kale waxaan u mahadcelinaynaa Ururrada ASU (Association of Somali Universities) iyo Somali REN oo gacan naga siiyay sidii aan u gaari lahayn qaar ka mid ah Jaamacadaha iyaga ka tirsan.

Xogtan waa la qaadan karaa, haddii la xuso xuquuqda lahaanshaha xogtan ee Iftin Foundation.



*Iftin Foundation*

*Maka Almukarama Rd.*

*Tel: +252 613 060905*

*Email: [info@iftinfoundation.org](mailto:info@iftinfoundation.org)*

*Website: [www.iftinfoundation.org](http://www.iftinfoundation.org)*